



Barnaamijka Dejinta Aadamiga ah

ISBEDDELKA ADEEGYADA COVID-19 DARTEED

Kaalmada hoos imanaysa Barnaamijka Dejinta Aadamiga ah way socotaa si ay u heli karaan macaamiisha inta uu socdo uu socda faafka COVID-19. Si kasta ha ahaatee, sida lagu bixiyo adeega waa laga yaabaa in ay wax iska bedelaan sida waafaqsan talada saraakiisha caafimaadka.

Fadlan la xiriir **adeegbixiyahaaga HSP** si toos ah si aad ugala hadasho qorshayaashan cusub.

Wax badan ka ogow wixii ku saabsan **COVID-19 iyo astaameheeda**.

Aragtida guud

Barnaamijka Dejinta Aadamiga (HSP) wuxuu siiyaa kaalmo kuwa ku yimid habka aadamiga si loo dhiso xirfadaha iyo aqoonta ay u baahan yihiin si ay isu tashadaan una noqdaan xubna firfircoon oo ka tirsan bulshada Australia.

HSP waxaa lagu bixiyaa magaca Xukuumada Australia waxaana bixiya adeegbixiyayaal lala heshiiyey Australia oo dhan. Ka qaybgelidda HSP waa lacag la'aan adeegyadana waxaa lagu bixiyaa qaab maarayn ah oo ku salaysan baahida.

Adeegbixiyaha HSP wuxuu kaalmeeyaa macaamiisha si loo hello natiijooyin iyada oo la raacayo dhinacyada mudnaanta taas oo asaas u ah degitaan guul leh:

- Shaqooyinka
- Waxbarashada iyo tababarka
- Adeegyada luqada
- Gurisiinta
- Maaraynta lacagta
- Caafimaadka maskaxeed iyo jireed iyo samaqabka
- Kaqaybgalka bulshada iyo isku xirnaanta
- Hawlgalka qoyska iyo kaalmada bulshada
- Cadaaladda

HSP waxaa loo sameeyey inay ka shaqayso iyada oo la jirta adeegyo kale oo degaan iyo kuwa guud. Waxay diirada saaraysaa xagga caawinta macmiilayaasha si ay u bartaan Ingiriiska una helaan waxbarashada lagama maarmaanka u ah iyo xirfadaha shaqada iyada oo la aqoonsan yahay in natiijada fiicani caawimayso kuwa ku yimid habka aadamiga Australia si ay ula qabsadaan nololsha Australia.

Adeegbixiyaha HSP wuxuu ku bixiyaa goobo muuqda macluumaadka cidda lala xiriirayana waxaa laga helaa **halkan**.

Xaq-u-yeelashada

Marka qof la siiyo mid ka mid ah fiisooyinka soo socda si ay u degaan Australia, waxay u xawishaa Wasaaradda Arrimaha Guduhu (Department of Home Affairs) adeegbixiyaha HSP si ay uga hellaan kaalmo HSP markay yimaadaan Australia.

- Qaxootiga haysta fiisada (subclass 200, 201, 203 iyo 204) iyo
- Fiisooyinka Khaaska ah ee Global Special Humanitarian (subclass 202) oo aanay ku jirin kuwa yimid habka loo yaqaan ka-qaybgalayaasha Barnaamijka Kaalmada Bulshada (Community Support Program participants).

Adeegyada

Maamulayaasha kaysaska HSP waxay si iskaashi leh ula shaqeeyaan macaamiisha si loo horamariyo qorshaha maaraynta shakhsiyeed loona bixiyo adeeyo ku xiran baahidooda shakhsiyeed.

Adeegyada waxaa ka mid ah kaalmo la taaban karo oo bilawga sida:

- Ku soodhowaynta maddaarka
- Imaanshaha goobta degidda barta macluumaad siinta
- Siinta cuntada ugu horraysa iyo waxyaalaha muhiimka ah
- Ka caawimadda ka diiwaangelinta Centrelink, Medicare iyo Bangi
- Wax ka qabashada baahiyaha caafimaad ee degdegta ah
- Awaamiirta wixii laga qabanayo xaalladaha degdegta ah iyo sida lagu hello adeegyada afcelinta
- La socodsiinta adeegyada maxaliga ah.

Adeegyada kale oo la heli karo si loo caawimo macmiilaha inay hellaan natiijooyinka degitaanka waxaa ka mid ah:

- Bixinta barnaamijka la-socodsiinta meeshay yimaadeen taas oo dhisaysa aqoonta macmiilaha wixii ku saabsan sida nolosha iyo qayimka Australia yahay
- Caawimada sidii loo heli lahaa degaan joogto ah
- Kaalmada helidda adeegyada muhiimka ah, kuwaas oo ay ku jiraan caafimaadka iyo adeegyada kaalmada qoyska
- Ku xirnaanta kooxaha bulshada ee agagaaraha iyo xarakaadyada
- Kaalmada iska diiwaangelinta Adult Migrant English Program (AMEP) iyo tegiddawaxbarashada
- Ka caawinta iska qoridda waxbarashada khusaysa iyo tababaridda iyo aqoonsiga xirfadaha qofku lahaa intuusan imaan wadanka iyo shahaadooyinkiisa
- Caawimada si uu qofku ula macaamilo adeegyada shaqada, hirgelinta istaraatiijiyada shaqada iyo helitaanka adeegga kaalmada si loo asaaso ganacsi.

Adeegbixiyaha HSP ayaa isaguna awooda sahlidda xeraynta dalabka Adeegga Tarjumidda ee Lacag-la'aanta ah (FTS) macaamiisha mudan si ay uga diraan online.

Ka bixidda HSP waxay ku salaysan tahay helitaanka macmiilaha natiijooyinka degitaanka lagu xusay qorshaha maaraynta kayskooda. Macaamiisha badankood, natiijooyinkaani waxay gaari doonaan 6 ilaa 8 bilood markaad timaado Australia.